SHEEKO IYO XOG KU SAABSAN ILKAHA

# Sheehooyinka Saga

## Ilko adag iyo suus xun



Josefine Sundström Emma Göthner

BONNIER CARLSEN



TACK

Folktandvården Sverige och Karolinska Institutet för engagemang och expertkunskaper vid framtagandet av boken!

Och till Generation Pep och Cancerfonden som gjort översättningen möjlig.

# HORDHAC

In qofku maalin kasta ilkihiisa cadayaa waxay muhiim u tahay in uu ka fogaado in suus ka galo ilkaha. Sidoo kale waa muhiim in ay ilkuhu calaliyaan cunto fiican si ay u noqdaan kuwo muddo dheer caafimaadqaba.

Buuggan la yidhaa *Sagasagor: Ilkihii adkaa iyo suuskii xumaa*, waa mid ku yimid iskaashi ay wada sameeyeen labada urur ee sida samafalka ah u shaqeeya ee la yidhaa Generation Pep iyo Cancerfonden.

Generation Pep wuxuu u taagan yahay sidii loo faafin lahaa aqoonta iyo sidii loo horumarin lahaa caafimaadka carruurta iyo dhallinyarada. Ururka Cancerfonden wuxuu u taagan yahay sidii loo abuuri lahaa bulsho u taagan horumarinta caafimaadka iyo sidii adeeg caafimaad oo fiican dadku u heli lahaayeen – si loo yareeyo dadka uu ku dhacayo xanuunka kansarku.


Aqoonta uu buuggani xambaarsan yahay waxa aannu rabnaa in aan faafinno si loo abuuro dhaqan wax-akhris iyo in la faafiyo aqoonta ku saabsan sida caafimaadka ilkuhu ugu xidhan yihiin jidhka intiisa kale.

*Generation Pep, Cancerfonden, Bonnier Carlsen,*
*Josefine Sundström och Emma Göthner*

Ururka Generation Pep waxa aasaastay amiiradda Iswiidhan iyo lammnaanaheeda. Hawlaha uu ururkani qabto waxa taageera ururro badan oo samafal ah, hay'ado iyo weliba shirkado waaweyn oo Iswiidhan laga leeyahay.







Saga waxa u timid warqad. Warqadda waxa ku qoran in ay ballan ku leedahay dhakhtarka ilkaha. Jimcaha marka ay saacaddu tahay kowda iyo rubuc waxa ay Saga Louisa Larsson ballan la leedahay oo ay la kulmi doonaa dhakhtaradda ilkaha ee la yidhaa Leyla.

Saga hore ayay u taqaannay Leyla. Waxay ku nooshahay guri ku yaalla Solrosvägen, sida Saga oo kale. Leyla marka ayna shaqada joogin ee ayna ilkaha dadka daryeelayn, waxay la joogtaa carruurta oo kala ah Samir iyo walaaladii. Saga iyo Samir waa saaxiib.

Bal qiyaas Samir hooyadii oo ah dhakhtarad ilkaha ah iyo Saga oo ku soo booqan doonta goobteeda shaqada.



Jimcihii markii la gaadhay wakhtigii la tegi lahaa dhakhtarka ilkaha, waxa xilli hore Saga ka soo kaxeeyay dugsiga xannaanada aabbeheed. Qadada ka dib waxa uu soo istaagay barxadda hore ee dugsiga, waanu u gacanhaadiyay. Keliya maaha Saga qofka maalintan dugsiga xannaanada laga soo kaxaynayay. Saga aabbeheed waxa kale oo uu maalintan dugsiga ka soo kaxaynayay Samir iyo waalaashiisa yar ee la yidhaa Joline si ay ugu raacaan dhakhtarka ilkaha.



Saga waxay u aragtaa in ay wax xiiso badan tahay in Samir iyo Joline u sii raacaan dhakhtarka ilkaha. Hadhow marka ay ka yimaaddaan ayay isku raaci doonaan guriga Samir si ay halkaa ugu wada ciyaaraan.


Aabbo waxa uu soo qaaday saabuunta xumbada ah ee la afuufo ee ay carruurtu ku ciyaarto, si ay u afuufaan inta ay baska sugayaan. Joline ayaa caagadda yar ee ay xumbaddu ku jirto haysa, mana rabto in ay Saga iyo Samir afuufaan.

– Eeg xumbada! ayay kor u tidhi iyada oo faraxsan oo gaadhiga carruurta lagu riixo ku jirta, ka dib markii ay saabuuntii xumbada ahayd duushay.



Dhakhtarka ilkuhu wuxuu ku yaallaa dhisme dheer oo u dhaw suuqa basaska laga raaco.

Dhismuhu waxa uu leeyahay albaabbo waaweyn oo culculus iyo kaabado dhagax ka samaysan oo balballaadhan. Waxa ay wiishka u qaadanayaan ilaa dabaqa saddexaad. Samir waa in uu baldhanka wiishka taabto. Caloosha ayaa yara cuncunaysa marka uu wiishka kor u raacayo. Saga waxay u aragtaa in wax kastaa yihiin wax xiiso badan.





Markii ay wiishka ka soo degeen, waxay u kaceen meel yar oo aad dukaan mooddo. Saga ayaa nin meesha fadhiyay u sheegtay in ay la kulmayaan dhakhtarka ilkaha ee la yidhaa Leyla. Ninkii ayaa u sheegay in ay fadhiistaan oo ay sugaan inta ay wakhtigooda gaadhayso.

Qolka sugitaanka waxa yaalla kuraasi fadhi ah iyo dhawr kursi oo caadi ah.

Qof kasta oo dhakhtarka sugayaa halkaasi ayuu fadhiistaa oo uu wakhtigiisa ku sugaa.

Gidaarrada waxa ku dheggan sawirro ah afaf iyo

ilko faraxsan. Halkaasi waxa kale oo ku yaalla goob yar oo carruurtu ku ciyaarto oo ay yaallaan alaabaha ay carruurtu ku ciyaarto, buugaag iyo waliba baabuurta carruurta.



Goobta ay carruurtu ku ciyaartaa waxay u eeg tahay mid xiiso badan, balse Saga waxa ay rabtaa in ay la sii yara joogto aabbeheed. Waxay u aragtaa in ay yara dhib tahay in la iska fadhiyo goobta dhakhtarka lagu sugo. Waxay ka xishoonaysaa dadka kale.

